



PPS Waxay Ku Martigelin Doontaa Goobo Caafimaad oo Tallaalka Carruurta ah Siddeed Dugsi

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ku martigelin doontaa goobo caafimaad oo tallaalka carruurta ah siddeed degmo dugsiyeed toddobaadyada soo socda si ay gacan uga geysato u fududeynta tallaalkada COVID-19 ardayda da'doodu tahay 5-11.

Degmadu waxay kala shaqayn doontaa Kaiser Permanente iyo Medical Teams International maamulka xaddiyada carruurta ee tallaalka Pfizer, kaas oo ka helay ogolaanshaha adeegsiga xaaladda degdegga ah Food and Drug Administration toddobaadkan, waxana la filayaa in si buuxda uu ogolaanshiyo uga helo Xarumaha Xakameynta Cudurada todobaadyada soo socda.

“Dugsiyadu waxay muddo dheer ahaan jireen goobo bulshadu ku kalsoon tahay oo loogu maamulo tallaalkada si dhakhso ah oo wax ku ool ah,” ayuu yidhi Kormeeraha Guud ee PPS Guadalupe Guerrero. “Waxa aanu ku faraxsanahay inaanu kala shaqayno Kaiser Permanente iyo Medical Teams International sii siinta lakab kale oo ah yareynta COVID-19 ah qoysaska PPS.”

Goobaha caafimaad waxa lagu martigelin doonaa dugsiyadan:

- Boise-Eliot/Humboldt Elementary
- César Chávez K-8
- Faubion PK-8
- Lent Elementary
- Rigler Elementary
- Rosa Parks Elementary
- Scott Elementary
- Sitton Elementary

Si ay u helaan tallaalka, ardaydu waxay u baahan doonaan in uu la socdo waalidkooda ama masuulkoodu. Tallaalka COVID-19 iyo tallaalkada xoojinta difaaca, iyo sidoo kale tallaalkada hargabka, ayaa sidoo kale ay ka heli karaan waalidiinta iyo masuuladu goobaha caafimaad. Goobaha caafimaad waxa la qaban doonaa gellinka dambe iyo galabtii si loogu fudaydiyo waalidiinta marin u helidda dugsiyada kadib ama shaqada kadib. Taariikhaha goobaha caafimaad waxa lagu dhawaaqi doonaa dhawaan.